# Maxaynu Ka Baran Karnaa Ibraahin Ismaaciil Uurcad iyo Sheekadiisa Faaftay ee Badmaaxnimo?

**W/Q Axmed Sanwilwilo**

**Abril 15, 2025**

---

1977dii ayay ahay markii qoraa Ingiriis ah oo ku caanbaxay cilmibaadhisyo khuseeya Itoobiya uu soo helay taariikh nololeed laga qoray Ibraahin Ismaaciil oo ahaa badmaax Soomaaliyeed oo ka soo jeeda xeebaha Maakhir. Dr. Richard Panchurst oo ah qoraaga qoraalkan soo helay waxa uu caruurnimadiisii wax ka deganaa guriga qoraa kale oo reer Biljam ahaa oo la odhan jiray Eugene Gespard Marin, ahna qoraaga uu Ibraahin noloshiisa uga waramayo, kaas oo uu muddo danbe isaga oo doon-doonaya arrimo ku saabsan ciyaar dhaqameedda Itoobiya uu soo xasuusanayo qoraa Marin, sidaasna uu dib ugu noqonayo guriga qoraaga. Qoraa Marin oo dhintay 1969kii ayuu gurigiisa tagayaaa waxa uuna la kulmayaa haweenay dhaxalkiisa haysa, halkaas ayuuna ka helayaa qoraalka taariikh nololeedka Ibraahin Ismaaciil oo loo yaqaano Ibraahin Uurcad. Sannadku markuu ahaa 1977 ayuu qoraalka baahiyay, kaas oo ka koobnaa shan qaybood oo lagu kala baahiyay laba cadad ( Early Somali autobiography by Richard Punkhrust) oo ka mid ah joornaal lagu magcaabo Afrika oo ka soo baxa dalka Talyaaniga.

Ibraahin iyo Eugène Gespard Marin (Gassie) waxa ay ku kulmayaan markooda u horraysa masaajid ku yaalla magaalada Cardiff oo dabcan ahaa mawlac yar oo uu nin Carab ah oo hudheel haystay ka smaystay xaga danbe ee gurigiisa. Maalin isaga oo Ibraahin iska jooga masjidka ayuu jikada ku arkayaa nin caddaan ah oo cunnokariyaha meesha la sheekaysanaya, isaga oo yaaban ayuu daf dhahayaa, cunakariyaha ayaana u sheegaya in ninkani xiisaynayo barashada diinta Islaamka, inkastoo uu Ibraahin xusayo in aanu diinta aqoon badan u lahayn haddana waxa uu isku dayayaa in uu u faa'ideeyo inta uu yaqaano, halkaas ayayna iskala jaanqaadayaan isaga iyo Marin. Marin ayaa Ibraahin ku casuumaya gurigiisa oo ku yaalla magaalada yar ee Whiteway ee Cotswold Hills ee dalka Iglan. Xilliyo kala duwan ayuu Ibraahin halkaa ugu tagayaa saaxiibkii, waxa uuna Marin ka codsanayaa Ibraahin in uu uga waramo taariikh nololeedkiisa, taas ayaana keenaysa in la helo taariikhda badmaaxa Soomaaliyeed ee Ibraahin. Xilli ku aadan 2013kii ayuu qoraa iyo tarjumaan Soomaali ah oo la dhoho Boodhari Warsame afka Soomaaliga u rogay sheekada Ibraahin, waxa uuna ku baahiyay shabakadda Wardheernews.

Si kooban haddii aan u dulmarno taariikhda uu Ibraahin kaga sheekaynayo noloshiisa, waxa ay noqonaysaa; waxa uu ku dashay deegaan aan ka fogayn xeebaha Maakhir (hadda Sanaag) ee Soomaaliya, si gaar ah uma xusna magaalada uu ku dhashay, waxa ayse u eg tahay in aanay ka fogayn Cadcado oo ah magaalo xeebeed qadiimi ah oo u dhow degmada Laasqoray oo hadda magac ahaan uun u jirta. Waxa uu dhashay gugii Deera Laaye oo ku aadan dhammaadka qarnigii 19aad. Isaga oo saddex sanno oo kaliya jira ayaa Aabihii lagu dilay dagaal dhex maray labada qabiil ee ay Ibraahin labadiisa waalid ka soo kala jeedaan (Aabihii; Warsangeli, Hooyadii; Dhulbahante), ka dibna waxaa soo korinaya oo kafaala qaadaya mid ka mida walaalihii oo geeljire ahaa. Sida uu xusayo, walaalkii Cabdille oo ah ninka kafaala qaaday aad ayuu ugu fiicnaa oo u xanaanayn jiray, muddo ka dib ayuuse guursanayaa. Waxaa korriinkiisa la wareegaya mid kale oo walaalkiis ah oo dabeecad xun uuna ka waayay naxariistii uu ka helay Cabdille, kolkaas ayuu ka tagayaa walaalkii wuxuuna iska dhiibayaa Cadcado oo uu ku ogaa Hooyadii. Nasiibdarrose waxa uu tagayaa Cadcado oo ay Hooyadii ka maqan tahay, bilo uu joogo ka dib ayuu Cadan oo loo ammaanay aadayaa.

Ibraahin isaga oo da’ yar ayuu bannaanka ku soo dhacayaa oo uu galayaa nolol is koris ah, waxa uu tagayaa dhulka Carabta oo uu ku noolaanayo nolol dayow ah oo raadinta quudku wax walba ka weyn tahay, nolol iska dibadjiif oo kale ah, muddo badanna waxa uu ku noolaanaya xariiftinimo magaalo; kol uu shaqo yar helo iyo kol uu isku dabaro habab aan wanaagsanayn. Marar dhawr ah ayaa Cadan iyo magaalooyinka ku dhow laga soo musaafurinayaa. Ibraahin mudadaa uu u dhexeeyo xeebaha Soomaalida iyo midda Yaman waxa uu qabanayaa shaqooyin kala jaad ah oo aan ka xusi karno; xooloraace (geel iyo adhiba u raacay carab), kalluunle, waardiye beer, shaqaale dooni, iibiye, xijiile, nadiifiye, shaqooyin dhismayaal iyo shaqooyin tira badan oo wada muruqmaal u badan.

Hawlahaas oo dhan kolka laga yimaado, xilli ku aadan 1914-15 ayuu Ibraahin noqonayaa badmaax, waxa uu raacayaa dooni uu masuul ka ahaa nin ay isku reer yihiin, doonidaas ayuu muddo ka shaqaynayaa, waxa uuna uga gudbayaa Markab dagaal oo uu Ingiriisku lee yahay, kaas oo shaqaale ka qoranayay Iran. Markabkaas dagaal oo qayb ka ahaa dagaalkii koowaad ee adduunka ayuu ka shaqaynayaa muddo hal sanno iyo dheeraad ah, waxa uu Ibraahin xusayaa in uu indhihiisa ku soo arkay argagaxa uu lee yahay dagaalka ilbaxu oo uu ula jeeday dagaalka laysu adeegsado hubka qarxa. 1918kii ayay ahayd markuu markabka dagaal ka degay oo dib loogu noolyay Cadan. Intii uu markabkaa saarnaa ama uu joogay Basra waxa uu Ibraahin maqlay meel Yurub la dhaho oo loo amaanay, waxa uu u haystay in ay Jabuuti ku xigto, markii uu Cadan ku soo noqdayna waxa uu u tabaabushaystay Jabuuti si uu Yurub u aado.

In door ah kolkii uu Jabuuti ku sugnaa oo uu nolosha la harjaday ayuu ku dhuuntay markab ka soo xirtay Shiinaha oo u socda Yurub, muddo ayuu sii saarnaa oo kolkii lagu ogaaday in uu ku soo dhuuntay markabkana waxaa ciqaab looga dhigay in lagu shaqaysto. Inta ay jidka ku sii jireen

waxa uu markabku mar ku hakaday Masar, halkaas oo ay isaga iyo rag kale oo ku soo dhuntay u malaynayeen in ay Yurub tahay, ayna damcayaan in ay ku hakadaan umase suuragalayso, way ka tagayaan waxayna sii marayaan dalal kala duwan, safar dheer ka dib, waxa uu markabku ku xiranayaa magaala ku taalla Faaransiiska halkaas oo uu Ibraahin ku degenayo.

Faransiiska si wacan ayaa loogu soo dhawaynayaa, shaqooyinka kala duwan ayuuna halkaa ka shaqaynayaa, muddo ka dib, ayuuna shaqo u raadsanayaa Markab Ingiriis ah maadaama ay ka lacag badnayd tan Faransiiska, waxa uuna tagayaa Landhan (London) oo uu markiiba uga gudbayo Cardiff oo uu maqlay in ay Soomaali badan joogto.  Cardiff ayuu u badnaanayaa joogisteeda, waxa uuna kala kulmayaa dhacdooyin kala duwan oo tirabeella oo ay ka mid tahay dagaal dhex maraya caddaanka magaalada iyo madowga oo Soomaalidu ku jirto ee magaalada, waxa uuna khibrad u yeelanayaa cunsuriyadda sarraysa ee waqtigaa ka jirtay Yurub. Aakhirkana magaalada Cardiff oo uu muddo degnaanayo ayay Ibraahin isku baranayaan Marin, qoraa Marin ayaana halkaa kaga codsanaya in uu uga sheekeeyo noloshiisii hore, taas oo sababtay in uu qoraalkani ina soo gaaro.

Taariikhdaa sare waa dulmar aan ku sameeyay sheekada xiisaha badan ee Ibraahin Uurcad, qofkii aad u xiisaynayana aan kula talin lahaa in uu akhriyo sheekada oo dhammaystiran, Ibraahinna uu si faahfaahsan uga waramayo noloshiisa. Waxa aan doonayaa in aan inta danbe ku xuso, waxa lagala bixi karo sheekada Ibraahin iyo in aan isku dayo in aan isla eegno waxa laga baran karo, fasirna guudna saarno hab fikirkii Ibraahin ee waqtigaa iyo sida uu u yaalay xaalka Soomaalidu.

Sheekada Ibraahin waxaa laga baranayaa sidii ay u noolaayeen Soomaalida xilligiisa joogtay, si gaar ahna Soomaalida xeebalayda ah ee ku noolayd xeebaha Maakhir. Waxaa laga taransanayaa magacyada deegaanada xeebaha u badan ee dhulkaa ku yaalay iyo dhulka bannaanka ah ee looga xagaa baxo xeebaha. Qofka akhriya waxaa u sawirmaysa sida ay dadkaasi u ahaayeen kalluumaysato, xoolo raacato, beeralay iyo xijiyaysato. Waxaa laga dhadhansanayaa sida uu deegaanku ugu wacnaa dhinacyadaa kala duwan. Waxa cajiibka ah ee laga dhex arkayo ayaa ah, qofka ku nool xeeb in uu si iskiis ah isaga noolaan karo, marar badan ayay Ibraahin saacidaysaa baddu oo isaga oo aan ehel iyo dad haysan uu ku baxsanayaa kalluunka uu ka soo jilaabanyo badda oo aan ugu kacayn wax qiime lacageed ah. Sidoo kale, waxa laga fahmayaa sheekada sida Soomaalidu isu bixin jirtay oo duruufaha ka hor yimaada ay ugu samaysan jireen xal ay noloshu bartay, kuwaas oo ay ka mid tahay habka laysu daaweeyo. Waxa uuna Ibraahin inoo sawirayaa sida uu ahaa dhaqanka Soomaaligu kolka la joogo martisoorka oo aad ka dareemayso in habka loola dhaqmo martida ay Soomaalida dhexdeeda ku waynayd siiba wanaajinteeda, isla dhaqankaasna ay Soomaalidu la tagtay Yurub iyo dalalka ay nolosha bideen. Inkastoo ay mar walba qabiil ahaan isu xigxigsanayeen, haddana waxaa meesha ka muuqata in isa sooryayntu ay qiime sare oo wanaag ah ka joogto dhanka Soomaalida. Waxyaabo badan oo ku saabsan habdhaqanka Soomaalida, ayaa laga dhadahansanayaa bilow illaa dhammaad, inkastoo ay jiraan dhaliilo iyaguna aan yarayn oo waqtigaa ka dhex jiray Soomaalida uuna qoraagu xusayo.

Inta uu Ibraahin ka waramayo noloshiisa ma xusayo maamullo ka jiray deegaanka uu joogay, kolka laga yimaado Sayid Maxammed Cabdulle Xasan oo uu xusayo mar uu safar ku jiray cabsi daranna uu ka qabay sida arxandarrada ah ee daraawiishtu boobka iyo dilka ugu gaysanaysay dadka, si gaar ahna waqtiyadaa waxaa ku qiyaasayaa in ay ku aadanayd is hayntii u dhaxaysay Sayidka iyo qabiilka Ibraahin. Waxa kale oo uu xusayaa Suldaankii Warsangeli, Suldaan Maxamuud Calishire, oo isagu ka talinayay deegaanka Maakhir, marka uu xusayo waa xilli ay reer Cadcado iyo nin dooni ganacsi wata oo ay u yeerteen khilaaf soo kala dhexgalayo, Suldaanka kolka ay isula tagaanna uu Suldaanku reer Cadcado ku xukumayo in ay u yeelaan ninka safarka u soo galay waxa uu tabanayo. Waxaana halkaa laga akhrisan karaa sida ay Soomaalidu u adeeci jirtay oday dhaqameedka, oo illaa hadda weli ka sii jirta deegaanno badan oo Soomaalida dhexdeeda ah.

Qodobka aan aadka uga helay ee aan is dhihi karo Ibraahin waa midka uu ku noqday dalmar meelo badan oo dunida ah taga, sidoo kalena gayaysiisay in uu khibrad badan u helo hab dhaqanka dadyowga kale ee dunida uu ugu tagay taas oo sababtay aakhirkii in ay noloshiisa oo qoran akhrino ayaa ah in uu ahaa nin jecel in uu wax walba tijaabiyo ama ka warkeeno. Kolka uu dhexda u galona wixii Alle ka siiyo ku dhisa talloobooyinkiisa danbe. Ibraahin isaga oo reer Miyi ah oo aan nolol magaalo khibrad badan u lahayn ayuu dhawr jeer tagayaa magaalada Cadcado, waxa ay faduushiisu sababaysaa in uu si fudud ku noqdo xeebalay oo warkeenkiisii koowaadba ka bilaaba in uu biyaha badda cabo, waxa uu mar kale arkayaa Hooyo ilmeheeda wax ku cabsiinaysa bakeeri jaban, waxa uuna u qaadanayaa in ay bakeeriga u jajabinayso oo siinayso, isku daygiisa wax walba ku aadan ayaa u gaynaysa in uu waqti danbe tijaabiyo oo isku dayo in uu bakeeri qadhiidho, balse, xaqiiqada ah in aan bakeeri la cunin ayay dhuuntiisu u sheegaysaa.

Waxa uu khataro badan ku galayaa inta uu geeljiraha la ahaa walaalihii, waxaana khatarahaa sabab u ahaa sidii uu marba wax u tijaabinayay, sidoo kale, inta uu dibad-wareega ahaa ee uu yaraanta ku maray xeebaha Soomaalida iyo kuwa Carabta, ayuu wax walba isku qaadayaa si uu uga warkeeno, waxaana ugu yaab badnayd mar uu isku biimaynayo nin uu shaqaale u noqonayo oo u wadanaya Qadar (Qatar) oo uu nolol ka raadsaday ayna xaalkiisu isu rogayso in la adoonsado, nasiibwanaagse si dirqi ah lagu furanayo. Isla sidaaas ayuu Ibraahin ahaa kolkii uu Yurub tagayna oo isaga oo aan cidna warsan ayuu caashaqay habka ay Soomaalidu timaha u jarato, ka dibna uu isku qaadayaa timajare aanu garanayn qiimaha lagu jaro, kolkii laga jarayna ay ku timi wax ka duwan waxa uu filanayay oo ahayd in lacagtuu is lahaa bixi shan laabkeed laga dalbay, iyadana uu furtay nin meesha joogay sidaasna lacagta looga khafiifiyay, taas ayaa Ibraahin u sababtay in uu ka barto cashar ah in aanu abidkii isticmaalin wax aanu qiimeheeda ogaan kolka hore.

Midda u danbaysa ee aan ka arki karno sida uu Ibraahin u jeclaa in uu wax badan ogaado ayaan ka arkaynaa sida ay u kulmeen isaga iyo qoraa Marin, xilli ay cunsuriyaddu badnayn isaguna aanu khibrad badan u lahayn qurbaha ayuu ogalaanaya in uu aqbalo martiqaadka Marin oo magaalo aan tiisa ahayn ku noolaa, sida uu isaguba xusayo waxa ay ahayd is biimayn laakiinse ay riixaysay

rabitaankiisa ah in uu wax badan ka kororsado, waana midda aan u lee yahay doonista Ibraahin ayaa sabab u ahayd akhrinta mahadhadiisa.

Ibraahin waxa uu marar badan xusayaa doorka qabiilku qofka ugu jiraan, inkastoo aanu yaraantiisa helin daryeel qabiil haddana waxa muuqanaysa sida ay Soomaalida dhexdeeda ugu weyn yahay qabiilku. Bilowgaba arrimaha qabiilka ayaa keenaya in uu Ibraahim agoomoobo, mar kale taas ayaa keeneeysa in hooyadii ay dadka u adeegto oo xooleheeda ku weydo, taas oo dagaalo qabiil sababeen. Taas oo jirta haddana waxa uu qabiilku ahaa dallad ay Soomaalidu aad u harsato, kolka dalka la joogo iyo kolka dibadda la joogo. Ibraahin marar badan ayuu ku baxsanayaa naxariis uu ka helay dad ay isku hayb yihiin uun, waxa aan xusi karnaa kolka uu xijiga la soo guranayo ilma adeertii sida ay ugu diirnaxayaan, gaabis walba oo dhankiisa uga yimaadana ay ugu dulqaadanayaan. Waxa uu tilmaamayaa kolkii ay Yurub galeen sida raggii Soomaaliyeed ee ay wada socdeen nin walba uu u soo dhaweeyay qabiilkiisu, waxa uuna si gaar ah u xusayaa labada qabiil ee Isaaq iyo Warsangeli oo iyagu ahaa kuwa ugu badan ee badmaaxyada ahaa ee fursadaha u doonan jiray Cadan, badidoodna aakhirkii deegaan ku noqday Cardiff Tiger Bay.

Xilliga uu Ibraahin noqonayo badmaaxa, doon ama markab dunida badankeed ku soo maraya, waxaa dunida reer galbeed fikta hore ahaa cunsiriyadda, waxaa badnaa aaminnaadda ay caddaanku aaminsanaayeen in aan sinnaba madowga loogula macaamili karin hab dadnimo ayna u qabeen in ay ka fadli badan yihiin. Kolkii uu Ingiriiska tagay ayuu la kowsaday dagaal u dhexeeya caddaanka iyo madowga ay Soomaalidu ka tirsanayd, waxa uu fahmi waynayaa waxa uu salka ku hayo dagaalkani. Kolka uu dagaalkaa ka waramayo waxa uu Ibraahin ka sheekaynayaa sida ay madwogu isu difaacayeen, si gaar ah waxa uu ugu waramayaa sida ay Soomaalidu ku wajahday in ay is difaacaan, isaga oo xusaya sida qabiilkiisu ay u difaacayeen nin ganacsade ah oo u goobtiisa ganacsi u ahayd reerka uu ka dhashay meel ay ku kulmaan, kolka aanay wax haysan ku soo hirtaan, marka ay safrayaanna ku aaminaan alaabtooda, waxa uu tibaaxaya sida weyn ee tolnimada leh ee ay ninkaa uga difaacdeen caddaanka oo dad badan ku dhaawacmeenba. Ibraahin waxa uu ka sheekaynayaa sida ay ahayd cunsuriyadda foosha xun ee ka jirtay dunida reer galbeedka, safarro uu ku galay cariga Ingiriiska ayuu naga dhex tusayaa heerka uu midabkiisu gaarsiiyay in magaalooyin dhan uu ka waayo meel uu ka seexdo isagoo wata lacagtii uu ku kiraysan lahaa, dadkuna ugu jawaabayaan in aanu u qalmin adeegooda maadaama uu madow yahay. Waxa uu soo tabinayaa foolxumada uu Maraykan ku soo arkay mar uu damcay inuu u wareego oo markab uu saarnaa ooga degto, balse, baskii u horreeyay ee uu raacay laguba takooray oo la fadhiisiyay kursi loogu tala galay madowga.

Waxyabahaa uu Ibraahin indhihiisa ku soo arkay ayaa u horseedaysay in uu su’aalo badan iska waydiiyo waxa ay reer galbeedku ugu yeedhayaan dunida kale. Waxa uu su’aal galinayaa ilbaxnimada ay ugu yeedhayaan dalalka ay guumaystaan nooca ay tahay. Waxa uu Ibraahin tusaalaynayaa sida  dhaqanka iyo xeerarka ay reer Yurub keeneen dhulka Soomaaliyeed (dabcanna

dalalka kale ay guumaystaanna waa la mid) uu u burburiyay tii dhaladka ahayd. Waxa uu xusayaa in berigii aanay reer Yurub Soomaalida u iman in dagaaladooda lagu hoobtay ay dad yar ku dhiman jireen iyadoo warmo iyo wax la mid ah isu adeegsanaya, balse, hadda oo ay reer Yurub yimaadeen lagu le'day hubkan casriga ah ama dagaalada ilbaxa, waxaa uu Ibraahin sheegayaa in awal qofka la dilo uu geesi dili jiray, haddase ay xabad wiifto ah naftaada galaafan karto, dhaqankan danbe ayuuna ku sifaynayaa *Cawaan Dhab Ah*, halka reer Yurub ay *Cawaan* ku tilmaamayeen kuwa hore. Waxa uu sheegayaa in waagii hore ay dadka is aamini jireen, in aanay dadku been qayaxan isula imaan jirin, in garta la galo sidii loo kala helo dhab ahaan loo qaadan jiray, in aanay qabiilku ama jilibku dhexdiisa iska guursan jirin oo ay reer shishe la xididi jireen si hadhow ay nabadda ugu soo dhaweeyaan waa haddii colaad dhacdo e, arrimahaa iyo kuwo kaleba way suuleen markii reer Yurub yimaadeen, dadku isma aamino oo khayaanadii iyo beentii qayaxneyd ayaa ilbaxnimo ah, gartii ay Soomaalidu aanay isugu eexan jirin hadda waa laysu haligayaa oo maxkamado ayaa loo helay, guurkii shisheeye waa joogsaday oo nin walba oo hanti haysta ina adeertii ayuu la xigsanayaa. Waxa uu waxaas oo dhan ku sababaynayaa in dhaqanka cusub ee lacagta ku dhisan uu suuliyay anshaxii dadnimo oo qof walba ka suuroobayso wax walba, kolkaas ayuu Marin ku dhahayaa hadal mug weyn oo duurxul ah; "Waxa aan se kuu sheegay uun waxa ilbaxnima-ku-sheeggu ay na tartay, adiga ayaana kuu daynayaa in aad kala xukunto in aan 'cawaannimadeenii' isaga sii jirno iyo aan 'ilbax noqonno'" hadalka duurxulka ah ayuu si kajan ah u lee yahay, reer Yurub ilbaxnimo nooma wadaan ee cawaannimo ayay noo wadaan.

Qodobka ugu mudan in la xuso waa in Ibraahin markii uu koray waxa ugu badan ee uu ka fakarayay ay ahayd Hooyadii, shaqooyinka adadag ee uu qabanayay iyo doonistiisa ah in uu lacag shaqeeyoba waxaa sabab u ahayd sidii ay naftiisu u doonaysay in ay Hooyadii wax tarto. Mar ayaa jirta uu qoraa Marin u soo bandhigayo Ibraahin in uu dego magaalada yar ee Whiteway, laakiin Ibaraahin ma yeelayo isaga oo arrinkaa sharaxayana waxa uu dhahaya; "Gassy waxa uu doonayay in aan sii joogo, laakiin noloshaa dabacsani iima cuntamayn iyada oo Hooyaday ay igu dhawrayso carrigii fogaa ee Soomaaliyeed. Waxa ay igu la qummanaatay in aan inta sida ugu dhakhsaha badan lacag u xoogsado aan carrigaygii aado." Waxaa halkaa ka muuqatana mudnaanta Ibraahin uu lahaa daruufta ay Hooyadii ku noolayd. Qaybaha hore ee sheekadiisa ayuu ka waramayaa xaaladaha adag ee ay Hooyadii martay ka dib markii ninkeedii labaad dagaal ku dhintay, xoolaheedii oo dhanna ay dhaceen dad ku soo duulay. Ibraahin oo u halgamaya sida uu Hooyadii wax u tari laa, ayaa ogaanaya dhimashada Hooyadii oo uu aad uga murugooday, taas oo markii danbe gaabis galisay shaqooyinkii ad adkaa ee uu qaban jiray.

Mahadhada Ibraahin waxa uu ku soo xirmayaa hambalyo iyo bogaadin uu u dirayo dad gaar ah, arintani waxa ay ina tusinaysaa hab fikirka Ibraahin meeshu uu gaaray, waxa ay inoo iftiiminaysaa qaabka ay u eg tahay dunida uu doonayo, waxa uu ina dareensiinaya harjadkiisii iyo socdaalladiisii kala duwana ee uu dunida ku soo maray waxa ay bartay. "waxa aan doonayaa in aan hambalyo kal iyo laab ah u diro mufakiriinta adduunka ee aan wali qolqollado yaryar maxaabiista ku ahayn ee

quruxda wayn ee adduunka ballaarani u muuqato.” Ayuu ku bilaabayaa, isaga oo tibaaxayaa in dunida aanay micne ka samayn is oodista iyo isu abtirintu. “Waa kuwa caqliyada lama dagaannada lagu abaarsaday naga raraya ee doogga iyo haraca lagu raysto geeddiga noogu furaya. Iyagana aan raaciyo kuwa bakhaylnimada meel iska dhigay ee raadinaya bulshoweyn caalami ah, Caddaan, Madow ama hurdi midabka ay doonaan ha yeesheen, illeen aniga waa isugu kaaya mide.

Eebboow aan kuwaa dunida guudkeeda laga waayin, illeen haddii ay dhacdo in la waayo waa aadane ciribgo’iisii e.” Tabtaas ayuu ku muujiyay doonistiisa bulshoweyn caalami ah oo uu u yaqaano cidda raadisay kuwo bakahaylnimo meel iska dhigay. Qoraalka Ibraahin waxa uu ku soo idlaanayaa maanso uu ku muujinayo jacaylka uu u qabo Soomaali idilkeed uuna u jecel yahay midowgeeda. “Aniga dhigaha Soomaaliyeed way dhiggaa simane -- Wada dhawro mooyee ma jiro nimaan ku dhaataaye”.

Axmed Sanwilwilo
Email: Ahmadek2018@gmail.com